



# Bandhigga faneed ee Franklin Fall wuxuu siinayaa fannaaniinta dugsiga dhexe aragtida mustaqbalkooda

Markuu macallinka Lent ee Chris Meade ardaydiisii dhexe ee ka tirsan kooxda heesaha u kaxeyey bandhigga faneedka ee Franklin Fall Festival ee dhowaan qabsoomay, wuxuu si layaab leh u daawaday ardaydiisa oo galaysaa hoolka casriga ah ee dugsiga sare.

“Allaylee, wey la yaabbeen,” Meade ayaa sidaas yiri. “Waxay dhahayeen waa shayga ugu wanaagsan. Waxay dhahayeen, ‘Meeshaan waa meel aad u wayn!’”

Si haddi loo eego, xafladdii waxay ahayd isu imaanshaha ee lagu qabanayay labo barnamij ay Wadeen Dugsiyada Dadweynaha ee Portland: [casriyaynta Franklin](#), waxaana mahad iska leh dammaanad codbixiyaha ee la ansixiyay; iyo hawlaha fanneedka ee degmada, ay taageerayso Canshuuraha Farshaxanimada ee Portland, iyo horumarinta [Master Arts Education Plan](#) (MAEP).

Mid ka mid ah yoolalka ugu muhiimsan ee MAEP waa abuuridda dariiqooyin farshaxan oo ardaydu ku baran karaan farshaxanka - muuqaal ama wax qabad - inta ay ku guda jiraan wakhtigooda PPS. Karen Bohart, oo ku jirta sannadkeedii labaad oo macallin muusig ka ah Franklin, ayaa howsha hore uqabanaysaa iyada iyo kooxdeeda.

Sannadkii hore, waxay kooxda heesaha ee Franklin gaysay inay bandhigooda ku qabtaan dugsiyada dhexe ee kooxda. Sannadkan, waxay mar kale qabatay dhacdo ay hadda ka hor qabatay muddadii 17 sano ahayd ee ay ku jirtay Dugsiga Degmada Reynolds waxayna keentay kooxdii heesaha ee Meade Lent, iyo kooxdii heesaha Dugsiga Dhexe ee Lane oo ay macallimad ka ahayd Judy Rose, Franklin, si ay u bandhig ugu hor sameeyaan, iyo, kooxda heesaha ee dugsiga sare.

Qiyaastii 45 arday ee dugsiga dhexe ayaa ka qaybqaatey Bandhigga Deyrta, iyagoo helaya fursad ay ku soo bandhigaan muusig kooxeedkooda goob ay dad badan ku suganyihiin. Iyagoo ay bandhigooda ka ag qabanayaan fannaaniinta dugsiyada sare ee Franklin, goobtaan quruxsan waxay ardayda siistay aragi ay dib u eegaan mustaqbalkooda.

“Aad bey u wanaagsanayd,” Bohart ayaa sidaas tiri. “Dhammaan carrurtaas ee dugsiga dhexe waxay dhahayeen, ‘Waan sugi lanahay muusig kooxeedka lagu qaban doonaa Franklin.’”

Bohart waxay jeclaan lahayd in ay hesho qaabab lagu daro dugsiyada kale ee xubnaha ka ah Franklin, gaar ahaan Dugsiga dhexe ee Mt. Tabor, oo aan lahayn barnaamij koox heesta ah, laakiin leh barnaamij koox muusiga ciyaara. Waxay kaloo rabtaa inay tusto ardayda heesta fursadaha kale ee fanka Franklin, sida riwaayadaha, oo isu diyaarinaya [wax soo-saarka deyrta](#), “Qoyska Addams, Musical.”

"Waxay noqon karaan aalad-yaqaan, waxay noqon karaan fannaaniin, waxayna noqon karaan jilaayaasha," Bohart ayaa sidaas tiri. "Waxay ku dhammayn karaan dugsiga sare."

Meade, oo ku jira sannadkiisii saddexaad ee Lent, ayaa sheegay in Bandhigga Dayrta ay ahayd fursadii ugu horreysay ee ardaydiisa ay uga baxaan dhismaha jaamacadda oo ay wax soo bandhigaan. Waxaa taas ka sii muhiimsan, waxay ayaga tusisay in muusiggu uusan keliya noqon mid ikhtiyaar ah oo si dhaqso ah loo ilaawi karo dugsiga dhexe ka dib. Waxay qayb ka noqon kartaa mustaqballoodaa.

"Taasi ayaan u sheegay, in kani ay tahay waxaagii, kani adiga ayaa iska leh, Meade ayaa sidaas yiri. Kaliya waa inaad iska qabataa."